



Technical Assistance ALLIANCE  
for Parent Centers  
8161 Normandale Blvd.  
Minneapolis, MN 55437-1044  
952.838.9000  
952.838.0190 TTY  
952.838.0199 fax  
888.248.0822 National Toll-free  
[alliance@taalliance.org](mailto:alliance@taalliance.org)

[www.taalliance.org](http://www.taalliance.org)

# Gadiidka iyo Ilmaha Naafada leh

Transportation and Children Who Have Disabilities—Somali version

## Maxuu waalidku u baahan yahay in uu ka ogaado xagga gaadiidka?

Sharciga Waxbarashada Dadka Naafada ah Individuals with Disabilities Education Act (IDEA) waxuu na farayaan in gaadiidku ka mid yahay howlaha la xiriira. Taasi micnaheedu waa hadii loo baahdo in ilmaha qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed leh xaq u leeyihii gadiid u qas ah. Waa in gaadiid iyo caawimaad loo fidiya ilmaha naafa ah ee uu:

- dugsiga ku taga kagana yimaadaan;
- dugsigani kaga tegi karaan oo ay dugsi kale ku tegi karaan;
- ku dhaqaaqi karaan dugsiga dhexdiisa ama dugsiga banaankiisa.

Ardeyda qaarkood ee naafada ah waxey u baahan yihii qalab u qas ah sida baska wiishka leh ee lagu qaada gaari curyaanka.

*Gabadha Jenny la yiraahda waxey isticmaashaa gaari curyaan oo ay ku dhaq dhaqaaqdo dugsiga gudihii. Waxey leedahay qorsho waxbarashada gaar ahaaneed. Waxey u baahan tahay in loo dhiso halka dalacaadda ah ee gaari curyaanka la mariya si ay isaga gudubto saraha dugsiga. Baahidan waxaa lagu daray qorshaheeda waxbarashada gaar ahaaneed. Waxaa kaloo qorshaha lagu daray baahida ay u leedahay baska wiishka gaari curyaanka qaada leh. Dugsiga ayaa u fidiya gaadiidka baska ah iyada iyo ilmaha kale oo ay isku xaafadda yihii.*

## Yaa go'aan ka gaara in ilmuu u baahan yihii howlaha gaadiidka?

Kooxda qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed oo uu waalidku ka mid yahay ayaa go'aan ka gaara in ilmuu u baahan yahay howlaha gaadiidka. Goa'aankani waxuu ku xoggan yahay qiimeeynta. Dugsiga ayaa abaabulaya howlaha gaadiidka hadii ay kooxdu go'aansato in ilmuu leeyahay naafo u diideysa in uu:

- la raaco baska ardeyda kale ee caadiga ah
- la tagi karo, kana soo laaban karo dugsiga ardeyda kale ee caadiga ah.

Wiiinka magaciisa la yiraahdo Monty waa ardey dhigta fasalka labaad. Monty waxuu leeyahay naafo u diideysa in uu dhug u lahaado halka uu joogo iyo in uu xaliyo waxyaabaha dhibaato ku ah. Kulanka lagu qorsheeyay qorshahiisa waxbarasho, kooxdu waxey go'aansatay in ay halis nafsadiisu u tahay in uu kelgii guriga ka yimaado ama aado. Laba goor ayuu ka habsaamamay halka baska is taago oo ah meel gurigiisa u dhow. Marna waxaa soo qabtay boliiska isagoo ka lumay halka baska laga raaco oo waddada gawaarida maraya. Kooxdu waxey qorshahiisa ku dartay in qof shaqaalaha dugsiga ka mid ah ka wehliyaa dugsiga il'aa albaabka guriga.

## Gadiidku waxuu ka mid yahay howlaha la xiriira ee qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed ee ilmaha. Waalidku ma in uu howshani lacagteeda bixiyaa?

Maya ma aha. Dugsigu waa in uu bixiyaa lacagta ku baxda howlaha la xiriira gaddidka ee ka mid ah qorshaha ilmaha.

*Jonah waa ardey aada dugsiga xannaanada oo ay waalidkiisu labadaba shaqeeyaan. Waxaa loo kaxeeyaa dugsiga xannaanada ku yaal xaafadda uu degan yahay. Jonah waxaa qiimeeyn ku sameeyay dugsiga dadweynaha, waxaana lagu qiyaasayin uu naafoleeyahay. Waxaa qorshahiisa ka mid ah in asbuucii labo goor laga kaxeeyo xannaanada ee loo geeyo taqasus daaweynta hadalka ah oo ku yaal dugsiga xaafadda. Dugsigu waxuu bixiyaa baska ka qaada xannaanada ee geeyaa halka daweeeynta hadalka. Waalidku lacag kama bixiyo howshan loo qabanayo.*

## Ardeyda naafada ah oo idil miyey xaq u leeyihii gaadiidka?

Maya uma laha. Waxaa keliya oo xaq u leh ardeyda naafada ah ee baahidooda gaadiidka iyo howlaha la xiriira lagu daray qorshahooda waxbarashada gaar ahaaneed.

Hadii howlaha gaadiidka uusan ka mid aheyn qorshaha ilmaha leeyihiin, dabadeed ilmahaa waxaxey la mid yahiin ardeyda kale.

- haduu dugsigu bixyo gaadiid lagu daadgureeyo ilmaha caadiga ah, dabadeed ilmaha naafada leh waa lala daadgureynayaa.
- haduu dugsigu bixin gaadiid lagu daad gureeyo ilmaha caadiga ah, dabadeed dugsigu siin maayo gaadiid ilmaha naafada leh lagu daad gureeyo.

*Sally waxey leedahay naafo laakiin uma baahna gaadiid qaas ah, qorshaheeda waxbarashana kuma jiro. Reerkeedu waxuu degan yahay meel in ka yar hal mile u jirta dugsiga. Degmada dugsiga ma bixiso gaadiid lagu daad gureeyo ardeyda deggan in ka yar hal mile. Sally waa u lugeysaa dugsiga ama reerkeeda ayaa ka debera waxii gaadiid ah oo ay u baahan tahay.*

### **Ilmaha itooda badan ee naafada leh ma waxey u baahan yihiin gaadiid qaas ah?**

Maya uma baahna. Ilmaha naafada leh intooda badan waxaa lagu daad gureeyaa gadiidka ama baska ardeyda caadiga ah lagu daad gureeyo. Mararka qaarkood, qalab yar oo lagu rakiba baska dugsiga ama caawiya ayaa ku filan ilmaha naafada ah.

*Carol waxey leedahay dhug laaan sal fudeyd leh Attention Deficit Hyperactivity Disorder. Mararka qaarkood waxey u dhaqantaa ama ku dhaqaaqdaa fcillo iyadoon ka fikireyn. Waxey baska la raacdaa ardeyda saaxiibbada ay la tahay oo ay isku xaafadda yihiin. Carol qorshaha loo sameeyay ee waxbarashada gaar ahaaneed waxaa ka mid ah qorsho akhlaaq wanaag oo laga doonayo in ay sharciyada iyo akhlaaqda baska lagu raaco barato. Wadaha baska iyo qofka caawiyaba waxaa tababar lagu siiyey sida loo fuliyo qorshaha akhlaaq wanaaga Carol. Waajibkoodu waa in ay fuliyan qorshaha oo ka mid ah qorshaheeda waxbarasho.*

### **Wiilkeyga waxuu adaa dugsi brifaati ah (private). Miyuu weli xaq u leeyahay gaadiidka?**

Waxey ku xiran tahay sida arintu tahay: Hadii ay kooxda waxbarashada gaar ahaaneed is la garatay in wiilkaagu aado dugsigaa si uu waxbarashada gaar ahaaneed uga qeyb qaato, oo naafada uu leeyahay daradeed ugu baahan yahay gaadiid, dabadeed jawaabtu waa haa. Baahidaa waxaa lagu qorayaa qorshahiisa waxbarasho, gaadiidna wuu helayaa. Hase ahaatee, hadii aad wiilkaaga u dirto dugsi brifaati ah oo aad adigu jecleysatay, sharci gooni ah ayey taasi leedahay. Taa jawaabteeda, ka wardoon qeybta waxbarashada gaar ahaaneed ee gobolka aad degentahay.